

## Video 1

### Waa maxay ELBP

Muuqaal	Ka-sheekeyn
1	Ku soo dhawow Kanada iyo luqadda fasalkaaga Faransiiska! Markii aad halkan waqti ku qaadato, waxaad baran doontaa Faransiis iyo waxa ay ka dhigantahay ku noolaashaha Kanada.
2	Fasalkaaga dhexdiisa, barahaagu wuxuu adeegsanayaa Xidhmo Qiimayn oo Luuqad-ku-saleysan, ama ELBP, si lagu tuso sida luqaddaadu u fiicnaaneyso.
3	Waqti kadib ayaad baran doontaa Faransiiska, adoo ka sii fiicnaanaya sida ugu badan ee aad wax uga barato macalinkaaga iyo in badan oo aad tababarato.
4	Waxaad u baahantahay inaad muujiso wixii aad baratay. Si lagaaga caawiyo inaad taas samayso, waxaad heli doontaa xidhmo aad adigu iska leedahay. Macallinkaaga ayaa ugu yeedhi kara feylkaaga.
5	Kani waa feylkaagii aad u adeegsan doonto fasalkaaga FLS. Waxaan kugu arki fasalka!

## Video 2

### Goorma ayaad isticmaashaa ELBP

Muuqaal	Ka-sheekeyn
1	Fasalkaaga dhexdiisa, waxaad ku tababaran doontaa Dhageysiga, Hadalka, Akhriska, iyo Qoraalka. Tani waxay gacan ka geysan doontaa hagaajinta Faransiiskaaga.
2	Waxaad ku ridi doontaan wixii aad baratay feylkaaga.
3	Waqti kadib waxaad arki doontaa sida Faransiiskaagu usoo fiicnaanayo.
4	Waxaad awoodi doontaa inaad dib u eegto wixii aad soo baratay oo aad la shaqeyn karto macalinkaaga si uu u go'aansado waxaad u baahan tahay inaad horumariso iyo waxa ku xiga ee aad baraneyso.
5	Feylkaagu waxa kale uu leeyahay macluumaad badan oo muhiim ah oo ku saabsan ku noolaanshaha Kanada iyo barashada Faransiiska.
6	Feylkan adigaa iska leh inaad ku isticmaasho fasalka dhexdiisa iyo guriga.

## Video 3

### Maxaa loo isticmaalayaa ELBP

Muuqaal	Ka-sheekeyn
1	Fasalkaaga dhexdiisa, barahaagu wuxuu ku weydiin doonaa waxaad rabto inaad barato. Waxaad dooran kartaa mowduucyo kaa caawin doona nolol maalmeedkaaga Kanada.
2	Waqti kadib waxaad arki doontaan sida Faransiiskaagu usii fiicnaanayaan.
3	Marka Faransiiskaagu sii wanaagsanaadaan, waxaad awoodi doontaan inaad waxyaabo badan oo kale sameyso oo ku saabsan nolol maalmeedkaaga sida aadidda waxsoo gadasho.
4	Ka fakir iyada, waxa barashada Faransiiskaagu ay kaa caawinayaan wixii aad ka sameyneyso nololshaada?
5	Xagga feylkaaga waxaad ka arki kartaa ilaa meesha aad gaadhay.

#### Fiidiyoowga 4

Markhaatiyaasha Af-faransiiska

*Dadka bixinaaya maragfurka fiidiyowgan waxay baranayaan Faransiiska. Qaybo ka mid ah qoraalka ayaa la saxay si xoog loogu bayaamiyo.*

*Habka Codka:* Isticmaalka ELBP ee gudaha fasalka waxay kaa caawin doontaa inaad barato Faransiiska. Bal aynu maqalno waxa ay qaar ka mid ah ardaydu ay rabaan inay sheegaan.

#### Habka codka: **Goormaad adeegsataa xidhmadaada feylka?**

Anigu waxaan u isticmaalaa xidhmada faylka markasta gudaha fasalka.  
Maalin kasta gudaha fasalka iyo guriga.  
Si aan u hubiyo howlaha aan fasalka ku qabtay.  
Waqtiga oo dhan. Tusaale ahaan, inaan qof ka caawiyo inuu shaqo helo.  
Si aan u dulmaro qoraaladayda.  
Markaan u baahdo inaan hubiyo heerka luqadeyda.  
Markaan rabo inaan habeeyo qoraaladayda iyo dukumatiyadayda.  
Gudaha gaarigeeyga, sidoo kale.

#### *Habka codka:* **Maxaad ku heysataa gudaha xidhmada feylkaaga?**

Waxaan xidhmada feylkayga ku haystaa buugga xusuus-qorkayga. Lagu daray dhammaan waraaqaha barnaamijka shaqada. Shaqada naxwaha, shaqada erayada.  
Waxaan ku heystaa qoraaladayd gudaha xidhmada feylkayga.  
Waxaa jira qaybo ku saabsan xirfadaha waxtarka u leh Kanadiyaanka cusub.  
Waan ku haystaa shaqadayda iyo shaqadayda guriga.

#### *Habka codka:* **Sidee ayey xidhmada feylkaagu kuu caawisaa?**

Aniga ahaan, xidhmada faylalkeygu waa sida buug gacmeed.  
Waxay u fiicantahay xagga dib-u-eegista iyo wax-barashada.  
Xidhmada feylkeyga ayaa iga caawiya inaan waxyaabo badan ka barto dhanka Kanada.  
Waxay iga caawisaa xagga habeynta, qiimeynta, iyo sidoo kale barashada Faransiiska, dabcan.  
Xidhmada feylkeyga waxay iga caawisaa inaan is habeeyo oo aan barto waxyaabo cusub.  
Xidhmada feylkeyga wax badan ayey i caawisaa.

#### *Habka codka:* **Maxaad u jeceshay inaad isticmaasho xidhmada feylkaaga?**

Waan jeclahay xidhmada feylkeyga sababta oo ah si wanaagsan ayaa loo habeeyay.  
Waxaan jeclahay inaan isticmaalo xidhmada feylkayga maxaa yeelay waxay iga caawisaa barashada Faransiiska.  
Waan jeclahay xidhmada feylkayga maxaa yeelay waxay igu caawisaa wax badan.

Habka codka: ELBP waxay ahayd mid caawisa kuwan wax baranaya. Kaalay bal arag sida ELBP adigana kuu caawin karto. Goor dhow baan ku arki doonaa!